Falkenbergs kommun

Macluumaad ku saabsan cabashooyinka iyo fikradaha

Cabasho ama fikrad ku saabsan xannaanada iyo iskuulka
Haddii adeegga xannaanada ama iskuulka uusan buuxin waxa aad filaysay, ama adiga ama ilmahaagu aad wax ka tabanaysaan, waad nala soo xiriiri kartaan.
Aragtidaada waa muhiim, sababtoo ah waxay naga caawinaysaa inaan hagaajino oo horumarino shaqadeenna.
Cabashada ama fikradda waa in loo gudbiyaa si tallaabo-tallaabo ah. Haddii aadan ku qanacsanayn sida dhibaatadaada loo maareeyay, waxaad u gudbin kartaa qofka ama waaxda ku xigta.

1. La xiriir iskuulka ama shaqaalaha halkaas ka shaqeeya.
2. La xiriir maamulaha iskuulka (rektor).
3. La xiriir madaxa qaybta (verksamhetschef) ama shaqaalaha taageerada.
4. La xiriir madaxa maamulka waxbarashada (förvaltningschef).
5. Haddii aadan weli ku qanacsanayn sida cabashadaada loo maareeyay, waxaad la xiriiri kartaa hay'adaha kale ee dowladda.

Bogga internetka ee degmada waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo gudbiyo cabasho ama fikrad. Sidoo kale, waxaad halkaas si internet ah uga gudbin kartaa cabashadaada ama dhibaatadaada.

https://kommun.falkenberg.se/barn-och-utbildning/lamna-synpunkter-pa-forskola-och-skola

Qaabka warqadda
Degmada Falkenberg
311 80 Falkenberg
Xarunta Xiriirka (Kontaktcenter) 0346-88 60 00
Iimayl: kontaktcenter@falkenberg.se
Bogga internetka ee degmada: kommun.falkenberg.